**Fariin ka timid Kormeeraha Guud Grotting**
Bulshada Qaaliga ah eeBSD,

Toddobaadkii hore, waxaan sheegnay dadaallada aan caadiga ahayn ee waaxdeena Waxbaridda & Barashada, oo ay ku jiraan macallimiinta, shaqaalaha taageerada iyo maamulayaasha - inbadan oo iyagu waqtigooda ku tabaruceen xilliyadii xagaaga si loo hubiyo inaan diyaar u nahay barashada khadka ah ee deyrta. Toddobaadkan, Waxaan jeclaan lahaa inaan aqoonsado dadaallada waaxyadeena taageeraya waxa ka socda dugsiyadeena. La'aantood shaqada shaqaalahaan aan caadiga aheyn, Degmadeenna ma shaqeyn karin.

**Adeega Shaqada (Business Services)**

- Adeegyada Ganacsigu waxay ka shaqaynayeen miisaaniyadda iyo arrimaha shaqaalaha la xiriira tan iyo xiritaankii. Kuwa soo socdaa waa tusaalooyin kuwo ubaahan fikir iyo tixgelin badan:
    - Kordhinta kharashaadka waxyaabaha sida PPE, agabka nadiifinta, soft-ka iyo qalabka
    - Shaqaaleynta Barashada Fog ee Dhameystiran iyo Iskuulka cusub ee FLEX Online-ka ah
    - Saamaynta shaqaalaynta ee khasaaraha suurtagalka ah ee ardayda sanad dugsiyeedka soo socda
    - U Diyaargarawga hoos u dhaca 67% ee la filayo Koontada Maalgashiga Ardayda ee sanad dugsiyeedka soo socda
    - Hoosudhac weyn ee dakhliga labada sano ee 2021-2023

**Waaxda Isgaarsiinta iyo Kaqeybgalka Bulshada**

- Waaxda Isgaarsiinta iyo Kaqeybgalka Bulshada (CCI) waxay hormuud ka tahay dadaallada lagu abuurayo 16,000 "Xirmooyinka Guusha Ardayga" oo ay la socdaan sahayda dugsiga ee barashada guriga-loogu qaybin doono ardayda u qalma cuntada bilaashka ah ama la qiime dhimay inta lagu jiro usbuuca koowaad ee Sebtember.
- Iyadoo lala kaashanayo hawlwadeenada bulshada, kooxdu waxay fududeysay qaybinta in ka badan 17,500 sanduuqyada cunto oo bilaash ah oo loogu talagalay qoysaska BSD ee xilligaan xagaaga baahan. Waaxdu waxay sii wadi doontaa inay u adeegto qoysaska sidan oo kale inta lagu jiro deyrta.
- CCI waxay u bedesahy Clothes Closet-ka Nidaamka ballanta kaliya sidaa awgeed adeeggan dib baa loo furi doonnaa Ogoosto 24. Clothes Closet-ka wuxuu bixiyaa dhar cusub iyo kuwo waxyar la isticmaalay oo la siinayo ardayda u baahan.
- Kooxda waxay ka shaqeynayeen sidii ay u abuuri lahaayeen habab dheeri ah oo ay ku soo gudbiyaan faahfaahinta isbebedalka la xiriirta qorshaha ku soo laabashada dugsiga iyadoo loo marayo websaydhka degmada, wargeyska toddobaadlaha BSD, boostada warbaahinta bulshada, fiidiyowyada iyo fadhiyada Q&A.

**Sinaan & Ka Qaybgalka**

- Xafiiska Sinaanta iyo Kaqeybgalka (OEI) wuxuu sii wadaa inuu taageero uuna iskaashi la yeesho waaxaha iyo iskuulada degmada oo dhan si ay sifiican u bixiyaan meelo barasho nabaddoon, aan takoor laheyn ee ardayda iyo shaqaalaha.
- OEI waxay u shaqeysay inay fududeyso Shirka Hogaaminta ee Xagaagan, waa Hordhac lagu Aqoonsanayo Doorkeena iyo Qaadashada Tallaabooyinka Hoggaamiyeyaasha ka horjeeda Midab-takoorka. Waxay ku dartay codadka ardayda iyo waalidka marka lagu daro horumarin xirfadeed oo laga keenay Xarunta Oregon ee Sinnaanta Waxbarashada.

**Dhismooyinka & Dayactirka**

- Markii uu xirnaa iskuulkii la tagayey, Kooxda Horumarinta Xarumaha waxay waqti u adeegsatey inay dedejiyaan dhowr mashruuc. Tusaale ahaan, kooxdu waxay awood u yeelatay inay diiradda saaraan dib u habeyn weyn ee Dugsiga Dhexe ee Five Oaks. Mashruuca ayaa la dhammaystiri doonaa saddex bilood kahore miisaaniyadna heysto.
- Kooxuhu shaqo adag bey hayaan, iyagoo qorsheynaya tilmaamaha isku-dhafka ah ee shakhsiyadeed oona qiimeynaya dhammaan dhismayaasha iskuulkeenna: dibedda dugsiga (meelaha laga soo galo iyo meelaha laga baxo), gudaha dugsiga (qolalka caafimaadka, qolalka go'doominta, kafateeriyada iyo maktabadaha) iyo fasallada (boos la isticmaali karo iyo booska macallinka).

**Xafiiska Shaqaaleynta (Human Resources)**

- Waaxda Shaqaaleynta waxaa loo xilsaaray inay ka hirgaliso dhamaan degmada barnaamijka aftaxa (furlough) ee shaqaalaha BSD, taasoo ka caawineysa degmada iney keydsato in kabadan $ 6 milyan. Waaxdu waxay sii waddaa inay u dooddo oo ay xaliso xubnaha haray ee aan weli si buuxda magdhaw loogu siin barnaamijka Work Share.
- Sababo la xiriira walaacyada miisaaniyadeed iyo is-beddelka isdiiwaangalinta, waaxdu waxay soo martay nidaamka waqti-qaadashada ee hirgelinta isbedelada shaqaalaha ee degmada oo dhan.
- Gu'ga iyo xagaaga ayaa sida caadiga ah Waaxda Shaqaaleynta u ah xilli aad u sarreeya sababo la xiriira riixida sanadlaha ah ee shaqaalaynta iyadoo shaqaalaha degmadu is casilaan oo ayna howlgab noqonayaan. Shaqaaleyntii dhaweyd, xilliga shaqaaleynta shatiyeysan ayaa dib loo dhigay oo loo qoondeeyay waqti cayiman, taasoo keentay sare u kac shaqada soo gudbinta, imtixaamida, shaqaalaynta iyo howlgelinta shaqaalaha cusub ee shatiyeysan. Macallimiinta Waaxda Shaqaaleynta waxay qorsheynayeen oo ay soo saarayeen khibrad shaqaalaha cusub ee Shaqaalaha si ay uga caawiyaan hanuuninta shaqaalaheena cusub ee jawiga fog.

**Waaxda Macluumaadka Tiknolojiyadda (Information Technology)**

- Waaxda Macluumaadka Tiknolojiyadda (IT) waxay sii waddaa inay wax ka qabato baahida ku xirnaanta ardayda. Ku dhawaad 500 oo calaamad(codes) oo loogu talagalay barnaamijka Iskuxirka Bulsho ee Internetka Comcast ay maalgaliso ayaa loo qaybiyey qoysaska u qalma. Intaa waxaa dheer, Mashruuca Sprint 1Million wuxuu siin doonaa ku dhawaad 300 oo khad oo loogu talagalay ardayda dugsiga sare. Ardayda dugsiga dhexe iyo dugsiga hoose ee aan haysanin marinka internetka ee guriga, waaxdu waxay u qaybineysaa 476 khad bisha Sebtember. Intaa waxaa u dheer, IT waxay sii wadeysaa

inay raadiso iskaashi lala yeesho xarumaha hoylaawayaasha iyo xaafada ay degan yihiin ardayda aan heysan marinka internetka.

- Kadib hubinta in dhammaan ardayda imaneysa ugu dambeyntii helaan aaladda waxbarashadooda, IT waxay u qaybineysaa 18,000 Chromebook-yo iyo ipad-yo cusub ardayda dugsiga hoose iyo kuwa dhexe. Macluumaad dheeri ah wuu imanayaa oo ku saabsan qaybinta.
- Kooxda IT-ga waxay bilaabeen Miiska Caawinta Ardayga waqti aad u yar si ay u buuxiyaan baahi aadka u daran guga. Laga bilaabo Sebtember 8, Xafiiska wuxuu dib u bilaabmi doonaa sanad dugsiyeedka cusub. Shaqaalaha ayaa diyaar u noqon doona qoysaska u baahan taageerada qalabka ama ka caawiya gelida codsiyada.

**Waaxda Adeegyada Nafaqada (Nutrition Services)**

- Adeegyada Nafaqada ayaa ka shaqeeyay hubinta in cunug kasta oo ka tirsan degmadeenna uusan gaajaysanayn xagaagan. Waaxdu waxay bixisay in ka badan 175,000 oo cunto 15 iskuul iyo seddex xaafad. Si lagaaga caawiyo iskuxirka farqiga u dhexeeya ilaa iskuulku bilaabmayo bisha Sebtembar, waaxdu waxay sii dheereysay cunnooyinka xagaaga laba toddobaad oo dheeraad ah 11 goob iskuul.
- Adeegyada Nafaqada ayaa isu diyaarinaya adeegga cuntada banaanka si ay dib ugu bilowdo usbuuca Sebtember 14. Waaxdu waxay kordhineysaa tirada goobaha iskuulada ee bixiya cuntada bannaanka waxayna sameysay doorasho cusub oo ah in cuntada guriga ku kuleysan kartid.
- Iyaga oo adeegsanaya qaybta fidinta nafaqada ee Sharciga Guusha Ardayga, Adeegyada Nafaqada ayaa ka dalbaday Gobolka in la keeno cunto bilaash ah 13 iskuul oo hoos imanaya Xaq u Yeelashada Bulshada sanad dugsiyeedka soo socda. Intaa waxaa u dheer, BSD waxay door bidaysaa Balaarinta tilmaamaha Dakhliga si qoysas badan ay u qalmaan quraac iyo qado bilaash ah, hadey codsanayaan apply for meal benefits.

**Waaxda Badbaada Dadweynaha**

- Intii lagu jiray qalalaasaha COVID-19, Waaxda Badbaadada Dadweynaha waxay talooyin ka heshay Khadka Badbaadinta Oregon. Warbixinadaasi waxay wax ka qabanayaan arrimaha xoogsheegashada, isticmaalka daroogada, damaca ismiidaaminta iyo badbaadada shaqsiyeed ee saameysa ardayda hadda iyo kuwii hore. Waaxdu waxay taageereysay ciidanka fulinta si ay uga jawaabaan walaacyada.

**Waaxda Gaadiidka**

- Waaxdu waxay hadda la shaqaysaa Adeegyada Nafaqada si ay u siiso adeeg geynta albaab-ka-albaab oo loogu talagay 30+ qoys oo uqalma kuwaas oo aan awoodin inay cunto helaan duruufaha awgood. Kooxda waxay sidoo kale sii wadeysaa inay la xiriirto qoysaska ardayda leh barnaamijyadeena khaaska ah ee la xiriira baahida gaadiidka marka aan u gudubno nooca hybrid-ka ah.
- Socodka wuxuu qaatay in kabadan 4,000 saacadood dib-u-fiirinta jadwalka baskeena kuna saleysan duruufaha badan ee xaadirida si loo hubiyo in si habsami leh bulshada u kala sikato oo loo hoggaansamo dhammaan tilmaamaha gobolka.

- BSD waxaa la siiyay maalgelin loogu talagalay laba iskuul bas oo korontada ah oo ay la socdaan kaabayaasha lagu cabeyn lahaa ee lagu taageerayay. Dhismo loogu talagalay cabeynta korontada wuxuu socdaa, waaxduna waxay sugeysaa inay howlgeliso basaska cusub guga 2021. BSD waxay sii wadaa inay sahamiso xulashooyinka ka baxsan isticmaalka naftada oo ay ka mid yihiin gaaska iyo koronto labadaba.

Anigoo ku hadlaya magaca bulshadeena oo dhan, waxaan rabaa inaan idiinka mahadnaqo dhamaan dadaalka aan kalaharka laheyn si aad u damaanad qaadataan bilow aamin ah oo qumman sanad dugsiyeedka cusub. Xaqiiqdi waxaad ku dayasho u tahay hashtag-geena, #BSDtogether!

Don Grotting
Kormeeraha Guud (Superintendent)

**Macluumadka Dib-ugu-Noqoshada Iskuulka**
Biloowga sanad dugsiyeedka ayaa u muuqda inuu waxyar ka duwanyahay sanadkaan. Laakiin ha walwelin, waan xalinay tan! Booqo wargelinta cusub Return-to-School webpage. Ka sokow Su'aalaha Dib-ugu-laabashada FAQ, waxaan ku darnay macluumaad ku saabsan xaqiijinta ardayga, agabyada dugsiga, kaalmada cunnada iyo ku xirnaanta internetka. Waxa kale oo aad ka heli doontaa mareegyo caawimaada ilaha bulshada sida qaybinta sanduuqa cuntada, Clothes Closet-ka iyo ururada bixiya guriyaynta iyo kaalmaynta korontada.

**Xirmooyinka Guusha Ardayga**
Waa mahadsanyahay  qof kasta oo ku deeqay tabaruca dhamaan degmada ee School Supply Drive! Waan kaaga mahadcelineynaa kaalmadaada!

Waxaan isku biirnay Beaverton Education Foundation iyo howlwadeena kale ee bulshada si aan isugu dayno inaan u fidinno Xirmooyinka Guusha Ardayga illaa 16,000 ardayda BSD ee hela kaalmada cuntada bilaashka ama la qiime jabiyay. Xirmooyinka waxaa la qaybin doonaa toddobaadka Sebtember 7.

Ma naga caawin kartaa inaan gaarno yoolkeenna? Fadlan tixgeli inaad ku tabarucdo BEF Back-to-School Equip Campaign. Waqtiga wuu socdoo!

**Jadwadka Sanad Dugsiyeedka**
Degmadu waxay kala shaqeyneysaa ururka macallimiintayada jadwalka sanad dugsiyeedka 2020 -21. Waxaana rajeyneynaa inaan helno isbuuca soo socda.

**Xussusinta Dhameystirka Cadeynta Ardeyga**
Hadaadan horey u sameyn , fadlan soo buuxi nidaamka Degmada ee xaqiijinta dib-u-noqoshada iskuulada ee ParentVUE. Waxaan waalidiinta ku dhiirigelinaynaa inay dhammaystiraan howlaha sannadlaha ah ee loo baahan yahay kahor intuuna dugsigu bilaaban.

Xaqiijintu waxay kuu oggolaaneysaa inaad laba-jeer fiiriso in macluumaadka muhiimka ah uu ka jadiidsan yahay nidaamkeena.

Booqo keena Back-to-School Verification webpage waxii macluumaad ah.

**Qorista Xanaanada (Kindergarten Registration)**
Hubi inaad sida ugu dhakhsaha badan u diiwaangeliso kindergarten-kaaga. Waxaad ka sameyn kartaa sidaas online. Hadaad ubaahantahay caawimaad, wac dugsigaaga hoose. Hadaad ubaahantahay adeeg turjubaan, wac Qaybtayada Luqadaha badan: 503-356-3755.

**Macluumaadka Qorista (Enrollment Information)**
Macluumaadka ku saabsan qoritaanka ilmahaaga waxaa laga heli karaa BSD website.

- hadaadan hubin iskuulka uu yahay iskuulka xaafadaada, fadlan booqo School Attendance Area webpage eena isticmaal cinwaanka meesha ku yaal si aad u go'aamiso xaduuda xaadiritaankaaga.
- Haddii aad u guurtay BSD gudaheeda oo aadan sii deganaan doonin xuduuda iskuulkaada, waad iska qori kartaa iskuulka loo qoondeeyay degaankaaga cusub ama waad dalban kartaa Wareejinta Maamulka. Macluumaadka iyo foomamka ayaa laga heli karaa Transfers webpage.
- Haddii guurtay oo aadan ku sii noolaan doonnin gudaha BSD, waxaad iska qori kartaa degmadaada cusub ama waad dalban kartaa bedelka Interdistrict. Macluumaadka iyo foomamka ayaa laga heli karaa Transfers webpage.
- Hadii hoy la'aan kugu dhacdo ama tahay hoy laawe, fadlan ka raadi macluumaad dheeraad ah McKinney Vento Homeless Program webpage.

**Habka Isku-habeynta Xuduudaha ee Dugsiga Dhexe**
Habka Isku-habeynta Xuduudaha ee Dugsiga Dhexe ayaa dib u bilaaban doonna bisha soo socota. Guddiga La-talinta ayaa qaban doona kulan khadka ah Khamiista, Sebtember 3 laga bilaabo 6:30 - 9:00 p.m. Shirka waxaa lagu qaban doonaa Zoom waxaana toos loogu diri doonaa janaalka Youtube-ka ee degmada.

Si aad wax badan uga sii baratid habka, sida loo soo gudbiyo faallooyinka ama leysugu qoro marqaatiga dadweynaha, booqo Middle School Boundary Adjustments webpage.

**Warsidaha-Iskuulka (SchoolMessenger)**
Ma ogtahay inaad maamuli kartid qaabka aad doorbidayso ee aad u heliysid emaylka, qoraalka iyo wicitaanka taleefanka ee BSD? Kaliya ku soo dejiso app-ka SchoolMessenger taleefankaaga oo raac tilmaamaha ku yaal BSD webpage. Waxaad sidoo kale iska qori kartaa ogeysiisyada digniinta qoraalka ee BSD. Kaliya qor "haa" una dir 67587. Ogow lambarka taleefankaaga hadda jira waa inuu ku jiraa feylka diiwaanka iskuulka ardaygaaga.